



## SALAAAN KAAGA TIMID MAYOR TIM BUSSE

**K**usoo dhawoow Bloomington! Tani waa magaallo adag iyo goob ku wanaagsan in lagu noolaado. Shaqadeenu waa inaan adeegsano bulsho dulqaad leh oo wanaagsan oo ay dadku doonayaan inay ku noolaadaan. Haddii magaallo ay ku guuleysan karto yoolkaan hiigsiga leh, Bloomington ayaa ku guuleysan karta. Aad ayaan ugu faraxsan nahay inaan qayb ka ahaano bulshadaan.

Barnaamijyada dalxiiska oo raaxaysil leh, beeraha raaxada oo qurux badan, in ka badan 9,000 oo dhulka cagaaran ah, xaafado amaan ah, fanka dadwaynaha iyo adeegyada tayada sare leh ayaa keliya qayb ka ah waxyaabaha wanaagsan ee Bloomington ay bixinayso. Sida ku cad 2023 National Community Survey™, 88% kamid ah dadka deegaanka ayaa ugu yeeray Bloomington meel cajiib ah oo ku wanaagsan in lagu noolaado leh adeegyada badbaadada dadwaynaha oo heer sare ah. Xog badan oo la xidhiidha adeegyada Bloomington ay bixinayso ka ogoow [blm.mn/welcome](https://blm.mn/welcome).

## Ku xIRNOOW

### KULANNADA BILAHA AH EE DADKA DHAWAAN SOO DAGAY MAGAALLADA

**M**agaaladu waxay qabataa kulanno bil kasta si ay u soo dhawayso dadka deegaanka ee cusub. Booqo [blm.mn/welcome](https://blm.mn/welcome) si aad u hesho taariikhaha iyo wakhtiyada

### LIISKA GALKA

**W**axyaabo badan ayaa ka socda Bloomington! Hal qaab oo aad ku ogaan karto waxa ka socda deegaankaaga waa inaad hesho Liiska Galka Ku Soo Dhawoow Bloomington. Waxaa ka buuxa waxyaabaha raaxaysiga leh ee aad samayn karto iyo meelaha aad arko karto si aad u barato xaafadaada cusub. Waxaad ku heli kartaa funaanadaada Liiska Galka Bloomington adoo soo gudbinaaya sawiradaada adoo adeegsanaaya foomka elektarooniga ah ama kula socoto hormarkaaga PDF la daabici karo, oo labadaba laga helaayo webseedkeena.

### MAGAALLADA BLOOMINGTON

1800 WEST OLD SHAKOPEE ROAD, BLOOMINGTON, MN 55431-3027

TEL 952-563-8700 MN RELAY 711



## DOORKAAGA QAADO

**G**udiyada tallo bixinta iyo goleyaasha ayaa bixiya hal fursad oo bulshadu ay kaga qaybgalayso arimaha quseeya Magaallada iyo dadka deegaanka. Dawlada Hoose waxay muhiimada saartaa faalooyinka iyo talooyinka laga soo uruuriyo gudiyada iyo goleyaasha kaladuwan ee tallo bixinta. Si aad u ogaato fursadaha hadda jira, booqo [blm.mn/boards](http://blm.mn/boards).



## HEL XOGTA

### WEBSEEDKA CUSUB EE DADKA DEEGAANKA

Booqo webseedka cusub ee dadka deegaanka si aad uga hesho ilo iyo xog la xidhiidha dadka ku cusub Bloomington adoo booqanaaya [blm.mn/welcome](http://blm.mn/welcome).

### WEBSEEDKA

Webseedka magaalada ([blm.mn](http://blm.mn)) waa isha ugu wanaagsan ee xogta ku saabsan adeegyada, mashaariicda, wararka iyo fursadaha Magaalada Bloomington.



### E-SUBSCRIBE

Iska diiwaan geli E-Subscribe, oo ah adeegga diiwaan gelinta iimeelka oo bilaash ah, si aad u hesho xogta ku saabsan mawduucyada Magaallada ee muhiimka kuu ah. Laga bilaabo xogaha cusub ee dhismaha ilaa faahfaahinta suuqa beeraleeyda, qof kasta xog ayuu helayaa. Iska diiwaan geli [blm.mn/e-subscribe](http://blm.mn/e-subscribe).”



### BARAHA BULSHADA

Magaallada Bloomington waxay boggag ku leedahay aaladaha Facebook, Instagram, X (Twitter), Nextdoor iyo YouTube. Si aad u raacato, booqo [blm.mn/social](http://blm.mn/social).



*Ku soo dhawoow*

**BLOOMINGTON**  
MINNESOTA

**MAGAALLADA BLOOMINGTON**

1800 WEST OLD SHAKOPEE ROAD, BLOOMINGTON, MN 55431-3027

TEL 952-563-8700 MN RELAY 711

